# Global Storybooks

globalstorybooks.net

## Anansi iyo xikmad

Ghanaian folktale
Wiehan de Jager
Anwar Mohamed Dirie

This work is licensed under a Creative Commons Attribution 3.0 International License.
https://creativecommons.org/licenses/by/3.0

# Anansi iyo xikmad



Ghanaian folktale
Wiehan de Jager
Anwar Mohamed Dirie

3

Soomaali so



Waagii hore dadku waxba ma aysan aqoon. Ma aynan aqoon sida miro loo beero ama sida dhar loo sameeyo ama sida bir qalab looga sameeyo. Illaaha cirka kore ee Nyame ayaa lahaa xikmadi aduunka oo idil. Waxa uu na ku kaydiyey dhari dhoobo ah.





Dhulka ayuuna jajab ugu burburay. Xikmaddii way xorowday si qof waliba qayb uga helo. Waana sababta ay hadda dadku u barteen sid loo beerto, sida dhar loo tosho, qalab looga sameysto birta, iyo wax walba oo kale oo dadku ay hada yaqaanaan sida loo sameeyo.



Waqti yar ba waxuu gaaray geedka dushiisa. Laakiin markiiba wuu istaagay waxa uu na ka fikiray, “Aniga uun bay ahayd midka heysto xikmad oo dhan, hadana meeshan wiilkayga ayaa iga xariifsan aniga!” Anansi aad buu u carooday dharigii dhoobada ayuu geedka kasoo tuuray.





Maalin maalmaha ka mid ah, Nyame waxuu goansaday in uu dhariga xikmada ah siiyo Anansi. Mar walba oo uu Anansi eego gudaha dhariga dhoobada ah, waxuu bartaa wax cusub. Waxa ayna ahayd arin aad u xiiso badan!



Damaaci Anansi waxuu ku fikiray "waa in aan ku xafidaa dhariga dusha geed dheer. Si aan dhamaan kaligay u heysto!" Waxa uu soohay xarig dheer, dharigii dhoobada ayuu ku wareejiyay, dhexda ayuuna ku sii xirtay. Waxuu bilaabay in uu geedka fuulo. Lakin aad ayay ugu adkayd fuulida geedka ayadoo dhariga ka garaacayay jilbaha mar walba.





Intaa oo dhan Anansi wiilkiisi yaraa ayaa taagnaa geedka hoostiisa oo daawanayay. Waxuu yiri, "Miyaysan sahlanaan laheyn in aad fuusho hadii aad dhariga dhabarka ku xirato?" Anansi waxa uu isku dayay ku xirashada dharigii dhoobada ahaa oo ay xikmadu ka buuxday dhabarkiisa, waxayna dhab ahaanti aheyd mid in badan fudud.